

# Barnaamijka Macmiilka-Shaqaalaha Daryeel Bixiyaha Ee Qiritaanka Shaqaalaha Daryeelka Guriga

Saxiixada aan saxiixayo dokumentigan, Waxaan \_\_\_\_\_  
xaqiijinayaa kuwa soo socda:

- In aan helay nuqulka Tilmaamaha Shaqaalaha Daryeelka Guriga.
- In aan fahamsanahay in aad ma'suul ka ahay akhrinta dhammaan qaybaha uu ka kooban tahay tilmaamaha la raacayo.
- In aan xafiiska APD/AAA ee degaanka ka codsan doono in ay iga caawiyaan fahamka macmuulaadka aan ka qabo su'aalo.
- In aan fahamsanahay in aanan noqon karin ama iska dhigi karin wakiil la oggol yahay oo uu leeyahay macmiilka-cida loo shaqeeyo haddii aan ahay shaqaalaha daryeelka guriga ee macmiilka-cida loo shaqeeyo.
- In aan fahamsanahay in aan ahay soo sheege ay ku waajibto in uu soo sheego 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood toddobaadkii isla markaana soo sheego xadgudubka ama xadgudubka la tuhunsan yahay ee loo geysto qof waayeelka ah, ilmo ama qof degan xarun dadka lagu xanaaneeyo ee dadka da'kasta leh.
- In aan fahamsanahay in la iiga baahan yahay in aan soo sheego xadgudubka ama xadgudubka la tuhunsan yahay ee dhaca saacadaha shaqada oo loo geystay qof adeeg hela iyaga oo adeegsanaya barnaamijka caafimaadka dhimirka bulshada ama naafanimada korriinka bulshada.
- In aan fahamsanahay in ay tahay in aan u hoggaansamo baaritaanada ay samayso Adeegyada Badbaadinta Dadka Waaweyn.
- In aan fahamsanahay in samaynta musuqmaasuq ay keeni doonto in la joojiyo diiwaan gelintayda daryeel bixinta iyo lambarka isla markaana ay tahay ciqaab sharci. Waxaan fahamsanahay kuwa soo socda:
  - In aanan diri karin biilka wixii saacado ah ee aanan shaqaynin.
  - In aanan diri karin biilka hawlaha aanan qaban ama aanan ku qornayn liiska hawsha.
  - In aanan ka qayb qaadan karin wax shirqool ah oo lagaga badbadinayo ama lagu been abuuranayo baahiyaha macmiilka-cida loo shaqeeyo ama nooca caawimo ee aan siiyo macmiilka-cida loo shaqeeyo.
  - In aanan diri karin biilka wixii saacado ah marka macmiilka-cida loo shaqeeyo aanu u qalmin in loo diro biilka adeegyada. Tusaalooyinka wakhtiyada aan biilka la diri karin waxaa ka mid ah balse aanay ku koobnayn, isbitaalka la is dhigo; deganaanshaha goobaha kale ee adeeg; xabsi lagu jiro; in laga maqan yahay magaalada ama gobolka ama dalka marka aanan raacin macmiilka-cida loo shaqeeyo si aan u siiyo daryeel.
  - In aanan diri karin biilka wixii saacado ah marka aan ka maqnaa magaalada, gobolka ama dalka ama haddii kale aanan la i heli karin si aan adeegyada liiska hawsha ku qoran u siiyo marka macmiilka-cida loo shaqeeyo.

- In aanan diri karin biilka wakhtiga safarka shaqo iyada aan isku hal maalin u kala safrayay macmiilka-cida loo shaqeeyo maahane isla markaana aanan samaynayn arrimo shakhsi ama arrimo kale oo loogu talagalay macmiilka-cida loo shaqeeyo.
- In aanan heshiis hoose oo shaqo geli karin isla markaana aanan weli diri karin biilka saacadaha uu qofka kale uu shaqeeyay booskaygii.
- In aanan shaqadiisa u qaban karin shaqaalaha daryeelka guriga isla markaana aanan u oggolaan karin in shaqaalahaasi uu diro biilka saacadaha aan shaqeeyay.
- In aanan bedeli karin xaashida shaqada ka dib marka uu saxiixo macmiilka-cida loo shaqeeyo.
- In aanan magaca macmiilka-cida loo shaqeeyo ku saxiixi karin xaashida shaqada.
- In aanan xaashida shaqada oo maran u soo bandhigi karin macmiilka-cida loo shaqeeyo si uu u saxiixo.
- In aanan diri karin biilka adeegyada guriga dhexdiisa la degan yahay toddobada maalmood toddobaadkii marka aanan deganayn guriga macmiilka-cida loo shaqeeyo, ama aanan joojin guriga macmiilka-cida loo shaqeeyo maalmaha la iga filayo in aan bixiyo adeegyada guriga dhexdiisa la degan yahay.
- In aanan sheegan karin adeega masaafada la socdo la xiriira ee aanan kaxayn gaarigayga.
- In aanan xaashida shaqada ku qori karin maalin gaar ah ama wakhti aanan shaqeyn.
- In aan fahamsanahay in aan wixii musuqmaasuq ee la tuhunsan yahay, oo uu ka mid yahay musuqmaasuqa uu ku kaco macmiilkayga-cida aan u shaqeeyo u soo sheegi doono xafiiska APD/AAA ee degaanka ama Khadka Musuqmaasuqa DHS.
- In aan fahamsanahay in aan ilaaliyo dhammaan macluumaadka ku saabsan macmiilkayga-cida aan u shaqeeyo ee qarsoodiga ah iyo in aan macluumaadka kaliya la wadaagi karo maamulaha dacwada ee macmiilka-cida loo shaqeeyo ama kalkaalida caafimaad ee bulshada ee la shaqaynaysa macmiilkayga-cida aan u shaqeeyo.

Saxiixa shaqaalaha daryeelka guriga

Taariikhda

U GAARA MAS'UULKA KALIYA	
<input type="checkbox"/> Signed form meets alternate method of orientation	Provider number _____
<input type="checkbox"/> Form signed in addition to in-class orientation	
<input type="checkbox"/> Date signed form received by local office: _____	<input type="checkbox"/> Career HCW <input type="checkbox"/> Restricted HCW
<input type="checkbox"/> Local office staff initials: _____	
<input type="checkbox"/> HCC staff initials, if verified by HCC: _____	